Ma is tiri … Codee!

Maxaad u Codeyn?
Waa xaqaada,
Waa doonistaada,
Waa mustaqbilkaada.

Si aad u codeyso waxaa qasab ah:

- Ahaansho dhalashada Kaneediyaanka.
- Waa in aad ahaataa ugu yaraan 18 sanno jir maalinta doorashada
- Cadeyn aqaoonsigaaga iyo cinwaankaada

Maxaa loo codeyn?

Codeynta waxay ka shaqeysiin demoqraadiyada. Waa habka aad u dooranlaheyd qofka kaaga wakiilka ah baarlamaanka Kanada. Sameyta doorashadaada ,waxaad si firfircooni leh ugu dhaqaaqi mid ka mid ah waxyaalha aad xaqa uleeday ee demoqraadiga ah.

Waa maxay gabi ahaanba Doorashooyinku?

Doorashau, waxaad u codbixin musharaxa aad dooratey ee xaafadaada(ama lagu magacaabo musharaxa degmada). Musharaxa ugu doorashada badan kadib waxuu noqonayaa xubin Baarlamaan. Xisbiga siyaasiga ee uugu badan musharaxiinta la soo doortey baa sameeya dowlada.

Ereyada aad u baahantahay in aad ogaatid

Doorashooyinka Kanada waa xubin madaxbanaan oo ay dejiyeen baarlamaanka si ay u maamulaan doorashooyinka dowlada ee kanada.

Codbixiyahu waa in uu ahaadaa muwaadin Kaneediyaan ah kaasoo ugu yaraan maalinta doorasha jirsadey 18 sanno jir. Codbixiyahu waa qof xaq u leh in uu codeeyo,iyo sidoo lake loogu magacaabo **codeeye**

Musharaxiintu waa dadka doonaya in la doorto.

Diiwaanka codbixiyaasha waxuu tusayaa magacyada codbixiyayaasha is diiwangeshay si ay u codbixiyaan.

Waxaad helaysaa kuugu iman boostada **warqada macluumaadka codbixiyaha** Taas oo cadeyneysa magacaada in uu ku jiro diiwaanka codbixiyayaasha iyo kuu sheegi goobta iyo goorta la codeynayo.

Goobaha Codbixinta waa meesha aad u aadeysid si aad u codeyso

Warqada codbixinta waa warqada aad u isticmaaleysid si aad u codeyso.waxaa ku taxan dhamaan musharaxiinta xaafadaada.

Sarkaalka wakiilka tikidbixiyaha waa qofka ku siinaya warqada codbixinta.

Karaaniga codbixinta waa qofka ka saxaya magacaada diiwaanka codbixinta taa oo tuseysa in aad codeysay.

Ilxirka lagu codeeyo waa meel xafidan taasood ku calaameyneysid warqadaada codbixinta. Codbixinta Kanada waa **sir warqada codbixinta.**

Muhiim

Marka aad codeynayso, waa qasab inaad cadeyso aqoonsigaada iyo cinwaankaada.Seddex si midkood ayaad sameyn kartaa

- In aad soo bandhigto warqad aqoonsi oo saxiix ah kuna daabacan sawirkaaaga,magaca, cinwaankaada ay na soo saartay wakaalad dowladeed. Tusaale leysinakaada darawelnimada.

  ama

- Inaad soo bandhigto labo warqadood ama kaarar aqoonsi ah. Labada warqadoodba waa qasab in uu ku qoranyahay magacaada iyo midna ku qoranyahay cinwaankaada.

  Tusaale sida kaarka caafimaadka iyo biilka korontada.

  ama

- Dhaar laga xaqiiqsaday cod bixiye diiwaan gashan, Qofkani waa qasab in uu heysto warqad cadeyn ogolaansho iyo in uu ka socdo isku goob codbixineed, Tusaale deriskaada, qofkula degan. (codbixiyaha waxuu qiri karaa qof qur ah,la qiraha ma qiri karo qofkale.)

Cadeymaha ogolaanshaha diiwaangelinta , daawo www.elections.ca

Ma heshay kaarkaadii macluumaadka codbixintaada?

Si aad u codeyso , waa qasab in magacaada laga helo diiwaanka codbixiyayaasha ee Doorashada kanada. Hadii magacaada iyo cinwaankaada saxa ahi ay ku jireen diiwaanka codbixiyaasha, waxaad ka helaysaa bostada **kaarka macluumaadka codbixiyaasha** isla marka doorasha bilaaabato. Taas oo ku tusaysa diiwaangelintaada,iyo waxay sheegi goobta iyo goorta aad codbixin kartid. Hadii magacaada iyo cinwaankaada kaarka **uusan sex aheyn.** Wac Doorashada Kanada 1-800-463-6868

Waxay kuu sheegi sida aad isku diiwaangelin si aad u codeyso.

Warqado aqoonsi oo haboon, waad isku diiwangelinkartaa marka aad codbixineyso.

Sidee loo Codeyn

Waxaad u codeynkartaa seddex mid midkood

Waxaad u codbixin shaqsi ahaan maalinta codbixinta

Maalinta doorashada, waxaad aadeysaa goobta codbixinta si aad u codeyso.Kaarkaada macluumaadka codbixineed waxaad ka heleysaa cinwaankaada xarunta codbixinta , marka la furayo.

Waxaad ku codbixinkartaa warqad qaas ah

Waad isticmaali kartaa warqad qaas ah si aad u codeyso oo ku dirtid boostada ama xafiiska Doorashada kanada ee agtaada, La xiriir wixii macluumaad dheeraad ah Doorasha Kanada.

Waxaad u codeynkartaa doorasha si sii horeysa

Waxaad ka heli kartaa warqada codbixinta meesha iyo waqtiga la codbixinayo si horeysa amd la xiriir Doorashada Kanada,

Goobaha Codbixinta

Sarkaalka macluumaadka wuu ku salaamayaa waxuuna ku tusi meesha aad dooneysid si aad u codbixiso.

Labada sarkaal ee xafiiska doorasha ayaa ah miiska . ku xigeenka sarkaalka tikedyada iyo karaaniga codbixinta.

Ku xigeenka sarkaalka waxuu ku weydiin in aad tusto cadeyn aqoonsi iyo cinwaankaada. Hadaadan heysan aqoonsi sax ah markaa, waxaad mari dhaar waxaadna codan qod ka codeeyay kana diiwangeshan xaafada aad ka codeyneysid in uu ku qiro.

Karaaniga codbixintu wuu hubin in aad ku jirto diiwaanka codbixinta. Hadaadanka mid aheyn diiwaanka codbixiyayaasha, waa lugu diiwaangilin.

Karaaniga codbixintu waxuu calaameyn magacaaada kana tiri diiwanka codbixiyayaasha.

Calaame X wareega dhinace magaca musharaxa aad dooratey.

Isku laab warqada codbixinta si uu u ahaato codbixintaada mid sir ah.

Dib ugu celi warqada codbixita Sarkaal kuxigeenka .Isaga ama iyada ayaa ka jari lifaaqa.

Sarkaal kuxigeenku dib ayuu kuugu soo celin warqadaadii doorashada si aad ugu rido santuuqa doorashada.

Warqadani (buuganyari) waxaa laga heli karaa dhaqanada iyo dadka asaliga luqadahooda.

Waxii macluumaad dheeraad ah:
www. Elections.ca
1-800-463-6868

TTY 1-800-361-8935 dadka dhagoolaha ama ku adag maqalka.
EC 90236 (08/09)